DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

**Sharci Lr. 11 ee October 1, 2018, kuna saabsan xeerka Tacliinta Sare ee Puntland**

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 64-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/56/2018 ee 1/09/2018;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Xeerka Tacliinta saree e Dawladda Punland

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

### Qodobka 3-aad

Dhaqangalka Sharcigani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland**

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

*Ref:*-XGGW/DPL/ 56 /2018 Garoowe, Sabti Date:- 01/09/2018

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixinta Xeerka Tacliinta Sare ee Puntland.**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-**

**MARKUU ARKAY:** Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa 64-aad

**MARKUU ARKAY:** Soo gudbinta K/S Madaxweynaha Ref: MWK/DPS/514/2017 ee Novermber 29,2017 kuna saabsan soo gudbin Xeer.

**MARKUU TIXGELIYEY:** Baahida loo qabo Ansixinta Xeerka Tacliinta Sare ee Puntland.

**MARKUU ARKAY:** Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey kalfadhigii 41-aad fadhigiisii 22-aad ee 12/08/2018 Xeerka Tacliinta sare ee Puntland.

**Wuxuu Guddoomiyey:**

**Ansixinta Xeerka Tacliinta sare ee Puntland.**

**Allaa Mahad Leh**

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladda
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

**Md. Axmed Cali Xaashi**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

Tell:- +252 90 7799977, Email: haashi7999@gmail.com Website:-www.puntlandparliament.net

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بو نت لاند الصومال

GOLAHA WAKIILADA

مجلس النواب

# XEERKA
# TACLIINTA SARE EE PUNTLAND

Garoowe, September/ 2018

**TUSMO......................................................................................................... Bogga**


XEERKA TACLIINTA SARE 5

QAYBTAI-HORDHAC 5

Qodobka 1-aad Cinwaan Xeerka 5

Qodobka 2-aad Fasiraad 5

Qodobka 3-aad Ujeedooyinka Tacliinta sare 8

Qodobka 4-aad Dhismaha Guddiga Tacliinta Sare 9

Qodobka 5-aad Xubin ka noqoshada guddiga tacliinta sare 10

Qodobka 6-aad Marag-aqooneedka magacawga guddoomiye, 11

guddoomiye ku xigeen iyo xubin guddiga 11

Qodobka 7-aad Shaqooyinka Guddiga: 11

Qodobka 8-aad Madaxa fulinta ee guddiga 13

Qodobka 9-aad Marag-aqooneedka u qalma Madaxa Guddiga Fulinta: 13

Qodobka 10-aad Xubnaha kale ee hawlwadeenada guddiga: 13

Qodobka 11-aad Hawl Socodsiinta Guddiga Tacliinta Sare 14

Qodobka 12-aad Luminta Xubinimada Guddiga Tacliinta sare 14

Qodobka 13-aad Aasaasid Jaamacad 15

Qodobka 14-aad Warqadda awoodda ku meelgaarka ah 15

Qodobka 15-aad Saamaynta warqadda awoodda ku meelgaarka ah. 16

Qodobka 16-aad Muddada warqadda awoodda-ku-meel-gaarka ah 17

Qodobka 17-aad La noqoshada warqadda awoodda-ku-meel-gaarka ah 17

Qodobka 18-aad Warbixinta aqoonsiga si loo bixiyo axdiga 17

Qodobka 19-aad Bixinta ama Diidmada axdiga. 18

Qodobka 20-aadSaamaynta axdiga 18

Qodobka 21-aad Faafinta (daabicidda) axdiga 19

Qodobka 22-aad Wax ka beddelid, ama la noqosho Axdi 19

Qodobka 23-aad Xeerar dhaqangal ah 20

Qodobka 24-aad Adeegsiga Magaca Jaamacadda aan lahayn oggolaansho Waafaqsan Qaanuunka.........................................................20

Qodobka 25-aad Aqoonsiga jaamacadaha dibedda 21
Qodobka 26-aad Madaxbanaanida akedeemiga ah 21
Qodobka 27-aad Xeerarka xukunka 22
Qodobka 28-aad Xubnaha xukunka ee Jaamacadda 22
Qodobka 29-aad Golaha Jaamacada dawladeed 23
Qodobka 30-aad Guddiyada 24
Qodobka 31-aad Guddoomiyaha 24
Qodobka 32-aad Guddoomiye ku xigeen 25
2. Guddoomiye ku xigeenka Jaamacadu waa madaxa fulinta ee Jaamacadda wuxuuna:- 25
b) noqon doonaa madaxa akaadeemiga iyo maamulka Jaamacadda. 25
t) Yeelan doonaa mas'uuliyada guud ee jeedinta (direction), maamuka iyo barnaamijyada Jaamacada. 25
j) Yeelan doonaa xilalka iyo waajibaadka uu bixin karo axdigu. 25
2. Guddoomiye ku xigeenka Jaamacadu wuxuu xafiiska hayn karaa muddo shan sano ah, wuxuna mudan yahay in loogu daro muddo kale shan sano keliya ah. 25
Qodobka 33-aad Hawlwadeenada Jaamacada 25
Qodobka 34-aad Ururka Ardayda 25
Qodobka 35-aad Ururka Qalin-jebiyayaasha 26
Qodobka 36-aad Maamulka Jaamacadda. 26
Qodobka 37-aad Kaalmada Xukuumadda 26
Qodobka 38-aad 26
Qiyaas sanadeedka dakhliga iyo kharashka jaamacadaha dawlad wadaagga iyo kuwa gaaarka loo leeyahay 26
Qodobka 39-aad Deeqaha Jaamacadda dawladeed. 27
Qodobka 40-aad Lacagaha aan la isticmaalin 27
Qodobka 41-aad Xisaabaadka iyo handti-dhawrka 27
Qodobka 42-aad Masuuliyadda hantida 28
Qodobka 43-aad Maalgelinta lacagta 28
Qodobka 44-aad Sanad Maaliyadeed 28
Qodobka 45-aad Maamulka maaliyadeed ee Jaamacadaha gaarka ah 28

Qodobka 46-aad Maalgashiga hantida ee Jaamacadaha gaarka ah 29
Qodobka 47-aad Shuruudaha diiwaangelinta 29
Qodobka 48-aad Codsi diiwaangelin 30
Qodobka 49-aad Ka baaraan degidda codsiga 31
Qodobka 50-aad Diiwaangelinta iyo Oggolaansho siinta kulliyadaha farsamo 31
Qodobka 51-aad Go'aan ka gaaridda codsi lagu noqday 31
Qodobka 52-aad Racfaan laga Qaato Diidmo 32
Qodobka 53-aad Halbeegyada Tababarada 32
Qodobka 54-aad Barnaamijyada Waxbarista ee kulliyada farsamada 32
Qodobka 55-aad U kuurgalka iyo Qiimaynta Kulliyadaha Farsamada 33
Qodobka 56-aad Magacaabida U kuurgalayaasha iyo Qiimeyayaasha 33
Qodobka 57-aad Dembiga Horistaaga ama Arbushaada 34
Dabagalka iyo qiimaynta 34
Qodobka 58-aad Wargelin Qoraal ah 34
Qodobka 59-aad Xiridda Kulliyadaha Farsamada 34
Qodobka 60-aad Halbeegyada Qaranka, kuwa caalamiga iyo Tayadhowrka 34
Qodobka 61-aad Isku Aadinta Tababarada iyo Qalinjebiyayaasha cusub 35
Qodobka 62-aad Hantida Guddiga Tacliinta Sare 35
Qodobka 63-aad Sannad Maaliyadeed 35
Qodobka 64-aad Qiyaasta sannadlaha 35
Qodobka 65-aad Xisaabaadka iyo Hanti-dhawrka 36
Qodobka 66-aad Shaabad u Dhex ah 37
Qodobka 67-aad Ka Ilaalinta Qaandhabid Shakhsiyadeed 37
Qodobka 68-aad U Qoolnaanta Waxyeellooyinka 37
Qodobka 69-aad Ganaaxyo guud 38
Qodobka 70-aad Xeerhoosaadyo (nidaamyo) 38
Qodobka 71-aad Hay'adaha Jira 39
Qodobka 72-aad Afeef (Qodobo guud) 40
Qodobka 73-aad Dhaqangalka Xeerka 40

## XEERKA TACLIINTA SARE EE PUNTLAND

## ISKUDUBARIDIDA QAYBAHA
## QAYBTA I- HORDHAC

1- Cinwaan Kooban.

2- Fasiraad.

3-Ujeeddooyinka Tacliin Jaamacadeedka.

## QAYBTA II-

## GUDDIGA TACLIINTA SARE

4- Dhismaha Guddiga.

5-Xubinnimada Guddiga.

6-Marag-aqooneedka Magacaabidda guddoomiye iyo Xubnaha Guddiga.

7- Shaqooyinka Guddiga.

8-Madaxa Fulinta Guddiga.

9- Marag-aqooneedka Magacaabidda Madaxa Fulinta Guddiga.

10-Saraakiisha kale ee Guddiga.

## QAYBTA III:

## QODOBO LA XIRIIRA ASAASIDDA JAAMACADAHA

11—Asaasidda Jaamacad.

12—Warqadda Awoodda ku Meel-gaarka ah.

13—Samaynta Warqadda Awoodda ku Meel-gaarka ah

14—Muddada warqadda Awoodda ku Meel-gaarka ah.

15—Burinta Warqadda Awoodda ku Meelgaarka ah.

16—Warbixinta Aqoonsiga si Axdiga loo Oggolaado.

17—Oggolaanshaha ama Diidmada in la Oggolaado Axdiga.

18— Saamaynta Axdiga.

19— Faafinta (daabicidda) Axdiga.

20— Wax ka Beddelidda ama la Noqoshada Axdiga.

21— Xeer-dhaqan gal ah

22— Adeegsiga aan Xeerka waafaqsanayn ee Magaca Jaamacadda.

23— Aqoonsiga Jaamacadaha Shisheeye.

24— Madax-banaanida Akaadeemiga ah.

## QAYBTA IV
## XUKUNKA IYO MAAMULKA JAAMACADAHA

25— Habka maamulka.

26— Xubnaha Xukunka Jaamacadda.

27— Golaha Jaamacadda Dawladda

28— Guddiyada

29— Guddoomiyaha.

30 —Guddoomiye ku xigeenka.

31— Hawl-wadeennada Jaamacadda.

32— Ururka Ardayda.

33— Ururka Ardayda Qalin-jebisay.

34— Maamulka Jaamacada.

## QAYBTA V
## QODOBO GUUD EE MAALIYADA JAAMACADAHA

## JAAMACADAHA DAWLADDA IYO KUWA WADAAGA AH

35— Kaalmada Xukuumadda.

36-Qiyaasta Miisaaniyad Sannadeedka Jaamacadaha Dawladda iyo kuwa Wadaaga ah

37— Maaliyadda Jaamacadaha Dawladda iyo kuwa Wadaaga ah.

38— Lacagaha aan la Adeegsan.

39— Xisaabaadka iyo Hanti-dhowrka.

40— Masuuliyadda Hantida.

41— Maalgelinta Lacagaha. Provision

42— Sannad Maaliyadeedka.

## JAAMACADAHA GAARKA AH.

43— Maamulka Maaliyadda Jaamacadaha gaarka ah.

44— Lacagaha ay Maalgeliyaan Jaamacadaha gaarka ah

## QAYBTA VI
## QODOBO LA XIRIIRA ASAASIDDA KULLIYADAHA FARSAMADA

45— Shuruudaha Diiwaangelinta.

46— Codsiga Diiwaangelinta.

47— Ka baaraan-degida Codsiga.

48— Diiwaangelinta iyo Bixinta Oggolaanshaha Hay'adaha Tababarada.

49— Go'aan ka Qaadashada Codsi dib loogu Noqday.

50— Gar-ka-noqosho (Racfaan) ka Qaadasho Diidmo Codsi.

## QAYBTA VII
## HEER-BEEGYO, TAYO IYO HABANAANTA (HABOONAANTA) TABABARKA

51— Halbeegyada Tababarada.

52— Barnaamijyada lagu Barto Kulliyadaha Farsamada.

53— Kormeerka iyo Qiimaynta Kulliyadaha Farsamada.

54— Magacaabidda Qiimeeyaha iyo Kormeeraha.

55— Dembiga Hor-istaagga Hawlaha Qiimaynta iyo u Kuurgelidda.

56— Ogaysiin (Oggolaansho) Sixid

57— Xiridda Hay'adaha Tababarrada.

58— Heer-beegyada Qaranka, kuwa Caalamiga iyo Hubinta Tayada.

59___Iswaafajinta tababaradda iyo xirfadaha shaqo.

60—Masuuliyadda Hay'adaha waxbarasho iyo kuwa Tayo Hubinta ee dhaqangalinta Heer-beegyada

## QAYBTA VIII
## MAALIGALINTA GOLAHA TACLIINTA SARE

61— Lacagaha Guddiga.

62— Sannad Maaliyayeed.

63— Qiyaas Sanadeed

64— Xisaabaad iyo Hantidhawr.

## QAYBTA IX
## QODOBO KALE

65— Shaabadda Golaha.

66— Ka Ilaalinta Uqoolnaan Shakhsiyadeed.

67— Masuuliyadda Waxyeellooyinka.

68— Ganaaxyo Guud.

69— Habraacyo.

## QAYBTA X

## QODOBO KU MEEL GAAR AH

70— Hay'adaha Jira.

71— Qodobo Guud.

# JADWALKA KOOWAAD
# QODOBO LA XIRIIRA HAB-DHAQANKA IYO HAWLAHA GUDDIGA TACLIINTA SARE

## XEERKA TACLIINTA SARE

Xeerkani wuxuu horumarinayaa tacliinta sare, asaasidda, aqoonsiga iyo xukunka hay'adaha tacliinta sare ee Puntland, Dhismaha guddiga tacliinta sare iyo ujeeddooyinka la xiriira.

# QAYBTAI-HORDHAC

## Qodobka 1-aad

## Cinwaan Xeerka

Xeerkan waxaa loogu yeeri karaa Xeerka Tacliinta Sare ee Puntland.

## Qodobka 2-aad

## Fasiraad

Xeerkan dhexdiisa, hadduusan ujeedku wax kale keenayn-

**Hawl-wadeenada akadeemiga:-**

Waxaa loola jeedaa qof walba oo loo magacaabay inuu baro, tababaro, ama cilmi baaris ka sameeyo hay'ad waxbarasho amaba hawl wadeen kale oo ay magacaabeen golaha jaamacada.

**Aqoonsi**:-

Waxaa loola jeedaa hannaanka ay guddigu ugu dambayn ku aqoonsadaan, dabadeedna ay shahaado ku xaqiijiyaan inay hay'adaas waxbarasho dhamaystirtay, siina wadayso dhamaystirka dhammaan halbeegyada akadeemiga, tababarada iyo baratanka sarreeya, kuwaas oo ay dejiyeen guddiga tacliinta sare iyagoo la jaanqaadaya qodobada xeerkan;

**Arday jaamacad dhamaysay:-**

Waxaa loola jeedaa xubnaha ka qayb gala shirarka ururka ardayda horay uga qalinjebisay hay'adaha waxbarashada sare;

**Shahaado**:

waxaa loola jeedaa heer marag-aqooneed oo ka hoosayasa "diboloomo ama wax u dhigma;

**Axdi**:

Waxaa loola jeedaa Axdiga (dastuur) loo oggolaaday Jaamacadda inay ku dhaqanto sida ku xusan qodobka **16aad;**

**Guddi:**

Waxaa loola jeedaa Guddiga Tacliinta Sare ee ku xusan qaybta **4aad;**

**Kulliyad farac ah:**

Waxaa loola jeedaa kulliyad jaamacadeed oo xeerkan lagu asaasay;

**Dibalomada:**

Waxaa loola jeedaa heer marag-aqooneed oo ka hooseeya digrii kana sarreeya shahaado;

**Digrii:**

Waxaa loola jeedaa marag-aqooneed heerka koowaad ee jaamacadda oo ka sarreeya dibloomada;

**Jaamacad shisheeye:**

Waxaa loola jeedaa jaamacad ku taal meel ka baxsan Dawladda Puntland, taasoo muraadkeedu yahay inay bixiso waxbarasho jaamacadeed Puntland dhexdeeda;

**Hay'ad waxbarasho:**

Waxaa loo jeedaa hay'ad guud ama gaar ama meel gebi ahaan ama qayb ahaan loo adeegsado inay bixiso waxbarasho Jaamacadeed, waxbarasho farsamo ama mid tababar;

**Wasiir**:

Waxaa loola jeedaa wasiirka markaas masuulka ka ah waxbarashada iyo tacliinta sare iyo wixii ku xayndaaban;

**Kormeerayaasha iyo qiimeeyayaasha:**

Waxaa loola jeedaa kormeerayaasha iyo qiimeeyeyaalka la magacaabay

sida ku xusan qaybta **53 ee xeerkan;**

**Jaamacad furan:**

Waxaa loo jeedaa Jaamacad bixinaysa tacliinta fog, iyadoo adeegsanaysa bareyaal sare iyo warbaahinta;

**Jaamacadda gaarka:**

Waxaa loola jeedaa Jaamacad lagu asaasay ama lagu socodsiiyo lacag gaar ah;

**Jaamacad dawladeed:**

Waxaa la yiraahdaa Jaamacad lagu asaasay ama lagu socodsiiyo lacago guud;

**Jaamacad La wada leeyahay:**

Waxaa loola jeedaa jaamcad lagu asaasay ama lagu socodsiiyo lacago kawada yimaada dawladda, dad ama hay'ado gaar ah;

**Golaha fulinta:**

Waxaa loola jeedaa golaha fulinta jaamacadda ama gole kale oo u dhigma;

**Maalgeliye:**

Waxaa loola jeedaa qof alla iyo qofkii soo jeedinaya inuu u istaagayo asaasidda hay'ad waxbarasho, ayna ka go'an tahay dhismeheeda, horumarkeeda, hirgelinteeda, dayactirkeeda, maamulkeeda iyo maalgelinteeda;

**Daneeye**:

Waxaa loola jeedaa qof ama koox dani ugu xiran tahay waxbarashada, tababar iyo hay'ad cilmi baaris kuwaas oo dano la xaqiijiyey ka leh waxtarka hay'adaas;

**Xeer dhaqangal ah**:

Waxaa loola jeedaa xeer hoosaadyo ay sameeyeen golaha jaamacaddu sida ku xusan **qaybta 2;**

**Ardayga baahida gaarka leh:**

Waxaa loola jeedaa arday naafo ka ah oogadiisa, caqligiisa ama dareenkiisa;

**Arday:**

Waxaa loola jeedaa qof walba oo iska diiwaangeliyey hay'adaha tacliinta sare;

**Tababar:**

Waxaa gudo gelaya waxbarashada farsamada, warshadaha iyo xirfadaha, taasoo u hoggaaminaysa gudoonsiinta shahaado ama diboloomo;

**Kulliyadda farsamada:**

Waxaa loola jeedaa hay'ad waxbarasho oo bixinaysa waxbarasho farsamo iyo xirfadaha ka gadaal dugsiga sare.

**Golaha Jaamacadda:**

Waxaa loola jeedaa hay'adda maamusha Jaamacadda;

**Tacliin sare:**

Waxaa loola jeedaa waxbarasho jaamacad, ka gadaal dugsi sare ama kulliyad farsamo;

**Hay'ad tacliinta sare:**

Waxaa loola jeedaa Jaamacad ama kulliyad farsamo;

**Booqasho Kormeer:**

waxaa loola jeedaa booqasho hawleed loo aado Jaamacad, guddoomiyuhuna ku taliyey sida ku xusan qaybta 29

## Qodobka 3-aad
## Ujeedooyinka Tacliinta sare

1. Ujeedooyinka tacliinta sare waxa ku jiri doona-

b) Waxbarista iyo tababaridda xirfadlayaal heer sare ah, si aad loogu horumariyo dhaqaalaha bulshada Gobolka;

t) Waxbarista ardayda dhinacyada aqoonta, xirfadaha iyo adeegyada si Puntland u hesho dad aqoon u qalanta iyo kartiba leh;

j) Kobcinta iyo horumarinta hal abuurka, fikirka isdhaliilka, falanqaynta iyo cilmibaarista;

x) Kobcinta, sare u qaadida, ilaalinta, diyaarinta iyo baahinta aqoonta, xirfadaha, aragtida iyo qiyamka bulshadu u baahan tahay;

kh)Samaynta cilmi baaris asaasi ah iyo mid dhaqangeli karta si aan wax ugu biirinno aqoonta ka jirta adduunka, iyo inaan furdaamino/xal u helno shiddooyinka ka jira bulshadeenna, taasoo aan ku hagaajin karno tayaynta iyo haboonaanta waxbarashada iyo cilmi baarista si dalku u horumaro;

d) Xaqiijinta qaybta tacliinta sare in ay si caddaalad ah u wada gaarto dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada reer Puntland;

r) Sare u qaado dhaqanka iyo nolosha bulshada reer Puntland

2. Hay'ada tacliinta sare markay gudanayso shaqadeeda, isla markaana hawl gelinayso awoodeheeda ku xusan xeerkan, waxaa hoggaamin doona mabaadii'da xukun ee soo socda:-

b) Inay si cadaaladi ku dheehan tahay sare ugu qaado helida tacliinta sare, taasoo
xoog uga go'an hay'adda, si loo daboolo baahida bulshada Puntland.

t) Inay hagaajiso tayada taasoo loo joogtaynayo horumarka dartiis.

j) Inay hubiso ku haboonaanta iyadoo isla markaasna ilaalinaysa xorriyada iyo madax-banaanida akaadeemiga.

x) Inay hubiso ololaynta dhaqaale si loo hubiyo joogtaynta; iyo

kh) Inay sare u qaado aqoonsiga waxqabadka saadaasha wanaagsan (promising practices), waxqabadka wanaagsan iyo hawl-gudashada aadka u sarreeya;

## QAYBTA II:
## GUDDIGA TACLIINTA SARE

### Qodobka 4-aad
### Dhismaha Guddiga Tacliinta Sare

1. Halkan waxaa lagu dhisay guddi, loo aqoonsanaayo Guddiga Tacliinta Sare
2. Guddigu wuxuu xeer ahaan noqonayaa hay'ad qaanuuni ah oo si isdaba joog ah xilka laysugu dhiibayo, yeelanaysana shaabad ka dhexaysa, awoodna u leh iyadoo adeegsanaysa magaceeda qaanuuniga ah:

b) inay dacwayso isla markaana la Dacwayn karo

t) in ay qaadato, soo gadato, ama keensato, haysato, iibsato ama wareejiso hanti guurto ah ama ma guurto ah si waafaqsan dastuurka iyo qawaaniinta kale ee dalka haddii hantidaasi tahay mid dawladeed ama mid wadaag ah.

j) soo amaahan karto lacag; bixin kartana lacag;

x) heshiisyo geli karto, iyo

kh)Samaynta ama gudashada wax kasta oo xeerar ah oo lagama maarmaan u ah gudashada toosan ee hawleheeda ku xusan xeerkan si qaanuunka waafaqsan ay u samayn karto hay'adan qaanuuniga ahi.

## Qodobka 5-aad

## Xubin ka noqoshada guddiga tacliinta sare.

1 Guddigu wuxuu ka koobnaan doonaa 18-xubnood oo uu soo magacaabayo Madaxweynaha DPL, waxaana soo jeedinaya Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada & Tacliinta Sare.

b) Guddoomiyaha Guddiga oo uu xilka Guddoomiyenimo u magacaabayo Madaxweynuhu.

t) Guddoomiye ku xigeenka oo ay iska dhex dooranayaan Xubnaha Guddigu.

j) Wasiirka waxbarashada iyo tacliinta sare kaasoo noqon doona xubin ku timid jagadeeda (xubin ex officio ah);

x) hal qof metelaya wasaaradda waxbarashada iyo tacliinta sare, kaasoo noqon doona xubin ku timid jagadeeda;

kh) shan qof oo ay soo xuleen, metelayana hay'adaha tacliinta sare ee Puntland.

d) labo qof oo ay soo xuleen hay'adaha shaqo bixinta ee ururka ganacsatada Puntland, iskaashatooyinka beerleyda iyo Kalluumaysatada.

r) hal qof oo ay soo xuleen metelayana cullimada diinta.

s) hal qof oo ku xeeldheer kaalmo ururinta, maareynta dhaqaalaha hay'adaha tacliinta sare;

sh) hal qof oo ku xeeldheer waxbarashadda, soo noqdayna maamule dugsi sare;

dh) hal qof oo metelaya wasaaradda caafimaadka;

c) labo xubnood kale uu magacaabay Madaxweynuha Puntland, iyadoo lagu salaynayo aqoontooda iyo waayo-aragnimadooda waxbarashada Jaamacadaha; iyo

g) madaxa xafiiska fulinta Guddiga, kaasoo noqon doona xubin ku timid tartan furan oo aan lahayn xuquuqda cod bixinta.

2. Xubnaha guddiga oo aysan ku jirin kuwa ku yimid jagadooda (ex offico) waxay xilka haynayaan muddo 5-sanno ah, waxaana dib loo soo magacaabi karaa 5-sanno oo kale.
3. Xubin ka mid ah Guddiga oo aan ka mid ahayn kuwa ku yimid jagadooda way ka tanaasuli kartaa magacaabiddeeda, iyadoo ku muujinaysa qoraal warqadeed lagu hagaajinayo Madaxweynaha.
4. Shirka ugu horreeya waxaa lagu meel marinayaa wixii la xiriira anshaxa hawsha guddiga iyo arrimaha la xiriira.

## Qodobka 6-aad
## Marag-aqooneedka magacawga guddoomiye, guddoomiye ku xigeen iyo xubin guddiga

1. Qofku wuxuu u qalmi karaa in loo magacaabo guddoomiye, ama xubin guddi haddii qofkaasi:-
    b) markay arrintu tahay guddoomiye iyo gudoomiye ku xigeen uu haysto shahaadada u sarraysa aqoonta ee diktooraa, kana soo baxay Jaamacad Puntland laga aqoonsan yahay.
    t) Markay arrintu tahay xubin metelaysa hay'adaha tacliinta sare, waa inay ugu yaraan haysto shahaadada u sarraysa aqoonta ee diktooraa, kana soo baxday Jaamacad WW&TS ee Putland aqoonsan tahay.
    j) Marka laga reebo xubnaha metelaya bulshada sida xubinta ganacsiga iyo tan culimada, waa inuu haysto ugu yaraan shahaadada koowaad ee heer jaamacadeed.
2. Marka lagu daro marag-aqooneedka ku xusan farqada 1-aad ee guddoomiyaha iyo xubnaha kale, waxa laga doonayaa inay aqoon dheeraad ah ay u leeyihiin tacliinta sare iyo siyaasadaha xukuumadda ee dhinacaas xiriirka la leh.

## Qodobka 7-aad
## Shaqooyinka Guddiga:

1. Shaqooyinka guddigu waxay yihiin inay: -
    b) sare u qaadaan ujeedooyinka tacliinta sare, gaar ahaan horumarinta, habaynta, keydinta iyo baahinta aqoonta si uu u dheefsado bani-aadamku.
    t) talo ka siiyaan wasiirka samaynta siyaasadaha la xiriira tacliinta sare.
    j) nidaamiyaan tacliinta sare ee Puntland.
    x) aqoonsi siiyaan hay'adaha tacliinta sare ee Puntland.
    Kh) aqoonsi siiyaan, kormeeraan barnaamjiyada tacliinta sare ee Puntland.

d) dejiyaan siyaasad qeexaysa shuruudaha iyo arrimaha looga baahan yahay soo gelitaanka hay'adaha tacliinta sare ee Puntland.

r) isku dubaridka qorsha fog oo ah horumarinta hawlwadeenada, deeqaha waxbarasho, iyo horumarinta dhismayaasha/kaabayaasha tacliinta sare.

s) sare u qaadaan midnimada qaran, iyo haybta hay'adaha tacliinta sare.

sh) kor u qaadaan, sii horumariyaan, baahiyaan islamarkaana dejiyaan halbeegyada ku habboon tayeynta tacliinta sare, iyadoo ay ku jiraan kor u qaadidda iyo taageerida heer-beegyada caalamku aqoonsaday.

dh) Isku xiraan waaxyaha xukuumadda, hay'addaha dawlada iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee dhaqaalaha saamaynta guud ahaan arrimaha la xiriira horumarinta shaqaalaha qaranka iyo baahi-tirkooda.

c) kala kaashadaan xukuumadda qorshayaasha horumarineed ee tacliinta sare.

g) u soo jeediyaan wasiirka xeer hoosaadyo ku aaddan rabitaanka ardayda doonaysa inay galaan, iska diiwaangeliyaana hay'adaha tacliinta sare iyo in la helo adeeg dhexe oo ku saabsan nidaamyada gelitaanka hay'adaha tacliinta sare.

f) Inay hubiyaan gacan ku haynta halbeegyada maadooyinka waxbarashada iyo imtixaanaadka hay'adaha tacliinta sare.

q) uga talo bixiyaan xukuumadda arrimo xiriir la leh tacliinta sare iyo cilmi-baarista kuwaas oo iyada oo aan laga maarmeyn tixgelinta xukuumadda.

l) ururiyaan, baaraan, haddana faafiyaan xogaha xiriirka la leh tacliinta sare iyo cilmi barista.

m) qorsheeyaan, haddana daboolaan baahida maaliyadeed ee tacliinta sare iyo cilmi baarista, iyadoo ay ku jirto baahiyaha soo noqnoqonaya iyo kuwa aan soo noqnoqonaynin ee hay'adaha tacliinta sare.

n) go'aamiyaan, dabadeedna uga talo bixiyaan Wasiirka qoondada lacageed (qoondada Miisaaniyadeed) ee Baarlamaanku ansixin doono, taasoo dabooli karta baahiyaha tacliinta sare iyo cilmi baaritsa, iyo dib u eegista kharashaadka loo qoondeeyey hay'adaha tacliinta sare.

w) aqoonsadaan isla markaasna barbardhigaan diboloomooyinka iyo shahaadooyinka ay bixiyeen hay'ado qalaad ee waxbarashada sare iyaga oo waafajinaya halbeegyada iyo xeerarka ay dejiyaan golaha tacliinta sare xilli kasta.

y) isku-duwaan waxbarashada iyo maadooyinka tababarada (farsamada gacanta iyo xirfadaha) ay bixiyaan hay'adaha waxbarasho ee ka sareeya dugsiyada sare iyadoo ujeeddadu tahay gelitaanka ardaydu ku biirayso ha'ydaha tacliinta sare, jaamacadaha, la-talinta iyo qiimaynta hay'adaha tacliinta sare.

b) Inay kormeeraan, haddana qiimeeyaan hay'adaha tacliinta sare, iyo

t) Inay gutaan wixii shaqooyin kale ah, ayna hawlgeliyaan awoodahooda markuu guddigu u arko inay lagama maarmaan u tahay gudashada xilkooda si waafaqsan xeerkan.

2. Guddigu meeshii ku habboon aragtidiisa, waxay u wakiilan karaan qaar ka mid ah xubnaha shaqada qof ama hay'ad u qalanta.
3. Si looga baaqsado shaki, guddigani wuxuu noqon doona hay'adda keliya ee iska leh awood ay gudato shaqooyinka lagu xusay qaybtan, haddiise uu khilaaf ka yimaado xeerarka qaybtan iyo xeerarka kale oo weli dhaqan gal ah, xeerarka qaybtan oo keliya ayaa la cuskan doonaa.

## Qodobka 8-aad
## Madaxa fulinta ee guddiga

1. Waxaa jiri doona madaxa fulinta ee Guddiga, kaasoo uu magacaabi doono Madaxweynuhu, markuu helo talo bixinta guddiga xulista kuna soo baxo tartan furan.
2. Guddiga xulista lagu xusay faqrada 1-aad, waxaa iyagana magacaabi doona Madaxweynaha markuu helo talo bixinta Wasiirka waxbarashada iyo tacliinta sare.
3. Madaxa fulinta ee Golaha wuxuu ka mas'uul noqon doonaa hawl maalmeedka arrimaha Golaha.

## Qodobka 9-aad
## Marag-aqooneedka u qalma Madaxa Guddiga Fulinta:

1. Qofku wuxu u qalmaa inuu noqdo madaxa guddiga fulinta haddii uu:-

b) Ka haysto marag-aqooneedka u sarraysa aqoonta ee diktooraa Jaamacad Puntland aqoonsan tahay.
t) Leeyahay ugu yaraan 10 sano oo khibrad maamul iyo waxbarid jaamacadeed isugu jira.

## Qodobka 10-aad
## Xubnaha kale ee hawlwadeenada guddiga:

Guddigu wuu shaqo-gelin karaa saraakiil iyo hawlwadeeno kale hadday u muuqato mid lagama maarmaan u ah gudashada hawleheeda sida ku xusan xeerkan.

## Qodobka 11-aad

## Hawl Socodsiinta Guddiga Tacliinta Sare

1. Guddoomiye ayaa hoggaamin doona dhammaan shirarka Guddiga Tacliinta Sare ee uu joogo, markuu maqnaado guddoomiye ku xigeenka ayaa hoggaanka la wareegaya.
2. Hadayse ay wada maqnaadaan gudoomiyaha iyo ku xigeenkiisu, xubnuhu waxay dhexdooda ka dooran doonaan guddoonka shirka.
3. Guddigu wuxuu kulmayaa ugu yaraan 3 jeer sannadkii, laakiin guddoomiyuhu markuu codsi qoraal ah ka helo ugu yaraan shan xubnood ee Guddiga, wuxuu qaban doonaa shir aan caadi ahayn markay doonto ha noqotee.
4. Tirada ugu yar (Quorum) ee shirka guddigu ku furmayo kuna socodsiinayo hawlaha guddiga ugu yaraan 12-xubnood oo u dhiganta 3/2 tirada guddiga Tacliinta sare.
5. Wax allaale wixii arrin ah iyo su'aal kasta ee shirka yimaada waxaa lagu go'aaminayaa codka tirada badan (aqlabiyad) ee kulankaas fadhiya oona coddeynaya.
6. haddii cododka isle'ekaadaan labo jeer, Guddoomiyuhu wuxuu yeelanayaa cod dheeri ah mar saddexaadka.
7. Guddigu waxay diiwan gelinayaa, keydanayaanna dhammaan qoraalka shirka, laguna go'aamiyey wixii shirka ka dhacay, waxaana lagu diiwaan-gelinayaa hab gaar ah oo loogu tala galay.
8. Madaxa fulinta ee guddigu wuxuu siinayaa wargelin (notice) dhammaan xubnaha laba todobaad ka hor inta aanu shir walba qabsoomin.
9. Guddiga waxay shirka ka qeybgelin doonaan (ku casumi karaan) hadba ciddii ay loogama maarmaan u arkaan markii ay isku raacaan xubnaha guddigu ugu yaraan saddex meelood meel.
10. Sida uu qabo qodobkani, Guddigu isagaa nidaamin karaya habraacyadiisa.
11. Guddigu wuxuu dhisi karaa guddiyo hoose haday u arkaan inay shaqadu ku habboonaanayso, waxayna siin karaan mas'uuliyad haday go'aamiyaan, marka laga reebo inuusan Guddigu xilalkiisa muhiimka cid kale ku wareejinayn.

## Qodobka 12-aad

## Luminta Xubinimada Guddiga Tacliinta sare

Waxay Xubinimada Guddiga Tacliinta sare ku luminayaan Xubinimadooda markii ay :-

1. Xubintu geeriyooto.
2 Xubintu istiqaalo keento si iskeed ah.
3 ay gudan weydo waajibaadkeeda shaqo sabab kasta ha ku timaadee.
4 ku xad gudubto dastuurka iyo Xeerarka kale ee dalka Puntland.

## QAYBTA III:
## ASAASIDDA JAAMACADDA
## Qodobka 13-aad
## Aasaasid Jaamacad

1. Jaamacad kasta oo Puntland laga aasaasayo waa in ay leedahay Axdi waafaqsan xeerkan.
2. Qof ama koox walba oo doonaysa inay yagleesho Jaamacad waxay qoraal codsi oo u habaysan qaabka la rabo u soo gudbin doontaa guddiga si ay u helaan Aqoonsi iyo Axdi.
3. Codsiga ku xusan faqrada 2-aad waxaa la soo raacin doonaa qabyo qoraalka axdiga jaamacadda la aasaasayo, kaasoo muujin doona waxyaalaha soo socda oo la xiriira Jaamacadda: -

   b) Haykalka maamul iyo habdhisyo.
   t) Xubnaha iyo hawlwadeennada.
   j) Habdhisyada maamulka maaliyadda.
   x) Horumarinta xeer hoosaadyada.
   kh) Adeegsiga shaabada Jaamacadda iyo gacan-ku-haynta qoraalka awoodda.
   d) Hannaanka si iskaa ah loo geba-gabeenayo xiritaankooda.
   r) Barnaamijyada akaadeemiga lagama maarmaanka u ah.
   s) kaabayaasha diyaarsan ama midka la qorshaynayo iyo goobta, oo ay ku jiraan xarumaha dhexe, kulliyadaha faraca ah, kuwaas oo meel marinaya halbeegyada kaabayaasha ee ay dejiyeen guddigu, iyo
   sh) Waxyaabaha kale oo ay guddigu u baahdaan.

4. Guddigu wuxuu tixgelin doonaa codsi walba oo la soo gudbiyo, iyadoo la raacayo faqrada 1-aad, waxayna u sii gudbin doonaan wasiirka iyadoo ay la socoto wixii talo bixin iyo aragtiyo gaar ahba.

## Qodobka 14-aad

## Warqadda awoodda ku meelgaarka ah

1. Guddigu wuxuu tixgelin doonaa codsi walba oo loo soo gudbiyey, kaasoo

waafaqsan qaybta 11, isagoo baaraya haddana qiimeynaya hantida codsadaha, taasoo meesha uu guddigu kaga qanco inuu codsaduhu soo buuxiyey xeerkan looga baahnaa, wuxuu talo bixin ku siinayaa wasiirka inuu u soo saaro codsadaha warqadda awoodda ku meelgaarka ah.

2. Wasiirku wuu bixin karaa warqadda awoodda ku meel gaarka ah sida ku xusan faqrada 1-aad, hadduu ku qanco inay hay'addaasi ka dib, marka la yagleelo, ay tahay mid wax ku biirinaysa horumarka waxbarashada jaamacadaha Puntland.
3. Guud-marka wixii hore ka sokow, guddigu isagoo la tashanaya daneeyayaasha kale wuxuu ugu talo bixin karaa wasiirka inay hay'adda la yagleelayo ku habboonaan karto in laga dhigo jaamacad dawladeed.

## Qodobka 15-aad
## Saamaynta warqadda awoodda ku meelgaarka ah.

1. Hay'adda la siiyo warqadda awoodda ku meel gaarka ah sida ku xusan qaybta (11) waxay noqon doontaa hay'ad qaanuuni ah oo si isdaba-joog ah xilka isugu dhiibaysa, yeelaynaysana shaabad u dhex ah, waxayna awooddaa iyadoo adeegsanaysa magaceeda wadaaga ah inay: -

   b) Dacweyso, lana dacweeyo.
   t) Hesho, haysato, iska wareejiso hanti guurto ah iyo ma guurto ahba si waafaqsan dastuurka iyo qawaaniinta kale ee dalka Puntland.
   j) Samayso walxo kale oo sidaas oo kale ah ama xeerar ay si qanuunka waafaqsan u samayso hay'adda wadaagga ahi.

2. Hay'adda loo oggolaaday warqadda awoodda ku meelgaar ah, waxay awood u heli doontaa: -
   b) Inay yagleesho (dhisto) hay'ad xukunta Jaamacadda.
   t) Inay sii wado horumarinta agabyada jaamacadda.
   j) Inay sii waddo ururinta ilaha akaadeemiga.
   x) Marka oggolaanshaha hore laga haysto guddiga, waxay xayeysiin kartaa hadanna u aqbali kartaa arday cusub barnaamijyada hay'adda.
   kh) Inay samaysato haddana sii wadato hannaanka hubinta tayada gudaha si ay u hubiso halbeegyada, tayada iyo waafaqsanaanta hay'addaas xeerarkan.
   d) Inay ka hawlgasho sidoo kale xeerar kale oo gudigu baahidooda yaqiinsaday.
   r) Ma jiri karo wax qaybtan ka mid ah oo loo fasiran karo in lagaga horjoogsado Jaamacad inay horumariso dhismaha kaabayaasheeda inta ay sugayso ama filanayso bixinta axdiga (dastuurka) sida ku xusan xeerkan.

## Qodobka 16-aad

## Muddada warqadda awoodda-ku-meel-gaarka ah

1. Warqadda awoodda-ku-meelgaarka ah ee lagu bixiyey sida ku xusan Qaybta (11) waxay dhacaysaa: -

   b) Kaddib markay dhammaato muddo afar sano laga bilaabo taariikhdii la bixiyey, iyadoo loo sameyn karo muddo koror kale oo 4 sano ah, iyadoo uu bixin karo wasiirku kaddib talo bixinta guddiga.

   t) Marka dib loogala noqdo (la buriyo) sida ku xusan Qaybta 15, ama

   j) Marka la bixiyo axdiga (dastuurka).

   x) Hay'addii warqadeeda awooda-ku-meel-gaarka ahi ku soo dhammaato sida ku xusan faqrada (b) waa la ogolaan karaa; ama (t) waa joojinayaa shaqada sida ku cad xeerkan.

## Qodobka 17-aad

## La noqoshada warqadda awoodda-ku-meel-gaarka ah

Wasiirku isagoo ku taagan talo bixinta guddiga, ama helay codsi uga yimid hay'adda ay khusayso, wuxuu dib ula noqon karaa warqadda awoodda-ku-meelgaarka ah si waafaqsan nidaamka soo geba-gebaynta xiridda jaamacadaha, wuxuuna ku soo saari doonaa ogaysiis faafinta rasmiga ah si ay u hirgasho.

## Qodobka 18-aad
## Warbixinta aqoonsiga si loo bixiyo axdiga

1. Guddigu ugu yaraan lix bilood ka hor intaysan dhicin warqadda awoodda ku meel gaarka ahi wuxuu diyaarinayaa warbixinta aqoonsiga, iyadoo tilmaamaysa in codsigii yagleelidda jaamacaddu uu dhammaystiray dhammaan shuruudihi laga rabay iyo in kale.
2. Guddigu wuxuu u gudbin doonaa wasiirka warbixinta aqoonsiga sida ku cad faqrada 1-aad iyo talo soo jeedinta labadaba.

## Qodobka 19-aad

## Bixinta ama Diidmada axdiga.

1. Wasiirku wuxuu ka baaraan degi doonaa warbixinta iyo talo soo jeedinta loo soo gudbiyey sida ku cad Qodobka 18-aad waxaase laga yaabaa-

    b) Haddii uu u riyaaqay in codsaduhu dhammaystiray shuruudihii laga rabay in lagu yagleelo Jaamacad, inuu talo ku siiyo Madaxweynaha bixinta axdiga ama ha noqdo qaabkii qabyo qoraalka ee hore ama qaab kale oo guddigu u arkay inuu ku habboonaan karo.

    t) In uu sii dheereeyo mudada warqadda awoodda-ku-meelgaar ah muddo afar sano oo hor leh oo kama dambays ah, ama

    j) Hadduu ku qancay in Jaamacadda codsigeedda la soo jeediyey inaysan dhammaystirin shuruudihii yagleelkeeda looga baahnaa, inuu diido codsiga.

2. Halka haddii wasiirku diido codsiga sida ku xusan faqrada 1-aad xarafka (j):

    b) Wasiirka wuxuu ku cadeyn= (sharrixi) doonaa codsiga sababaha loo diidey.

    t) Warqadda awoodda ku meelgaarka ah ee loo bixiyey sida ku xusan xeerkan, waxaa lala noqon doonaa muddo ku siman hal sano, codsaduhu wuxuu dib u keeni karaa codsi cusub si waafaqsan xeerka, islamarkaana

    j) Wasiirku isagoo la tashanaya guddiga wuxuu magacaabi karaa qof ama ka badan si ay u sii maamulaan Jaamacadda, si loo ilaaliyo danaha ardayda iyo hawl-wadeennada sida ku xusan nidaamka.

3. Faqrada 2-aad, waxay ku dhaqan gelaysaa marka warqadda awoodda-ku-meelgaarka ah lala noqdo iyadoo la sameeyey wixii isbeddelo ah ee loo baahnaa sida ku xusan Qodobka 17-aad

## Qodobka 20-aad

## Saamaynta axdiga

1. Jaamacadda la siiyo axdiga sida waafaqsan Qodobka 19-aad

    b) Waxay noqon doontaa hay'ad (haykal) qaanuuni ah, waxayna sii wadi doontaa hawleheeda Jaamacadeed sida lagu ballan qaaday warqaddii awoodda ku meelgaarka ah, sida shaqaaleynta hawlwadeennada, marka laga reebo ficil axdigu si qayaxan wax uga beddelay.

    t) Waxay u ololayn doontaa khayraadka waxbarasho.

j) Waxay sii horumarin kartaa, isla markaana dhaqaajin kartaa barnaamijyo cusub oo akaadeemiga ah, kuwaasoo markii loo baahado uu dib-u-eegis ku samayn karo guddigu sida waafaqsan qodobbada axdigaan.
x) Waxay yagleeli kartaa xarumo dhexe (campuses) iyo kulliyado farac ah, kuwaasoo ay waajib tahay inay u hoggaansamaan halbeegyada lagu sameeyey si xeerkan waafaqsan, iyo
kh) Waxay bixin kartaa shahaadooyin heerar kala duwan sida digrii, dibolooma iyo shahaadooyin oo ay ku jirto shahaado sharafeedku.

2. Guudmarka faqrada 1-aad ka sokow, kulliyadaha faraca iyo xarunta dhexe ee ha'ydaha waxbarasho wax goobo ama hawlo ganacsi ah lama wadaagi doonaan hay'ado ganacsi, mana wada jiri karaan.

## Qodobka 21-aad

## Faafinta (daabicidda) axdiga

Wasiirku, isagoo wargelinaya ayuu Faafinta rasmiga ah ku daabici doonaa axdiga la oggolaaday sida ku xusan Qodobka 19-aad.

## Qodobka 22-aad

## Wax ka beddelid, ama la noqosho Axdi

1. Madaxweynuhu isaga oo ku taagan talo bixinta guddigu u soo mariyeen wasiirka, ayuu diidi karaa, dooran karaa, ama si kale wax ka beddel ugu samayn karaa xeerarka axdiga haddii uu u arko inay diidmadu, ama wax ka baddelku axdigu ay ku jirto danta ugu habboon ee waxbarashada Jaamacadeed ee Puntland.
2. Wax ka beddelka sida ku xusan farqada 1-aad waxaa ku jiri kara soo bandhigidda nidaamyo u awoodsiin doona Jaamacadda inay si wanaagsan u gudato shaqooyinkeeda.
3. Talo bixinta sida ku xusan faqrada 1-aad waxa keliya oo la samayn doonaa ka dib markii Jaamacadda fursad loo siiyo in la dhegaysto, isla markaana guddigu si waafaqsan nidaamka uu u soo kormeeray Jaamacadda ay khusayso, dabadeedna uu ku qanco in Jaamacadani aysan taag u yeelan doonin inay wax ku soo kordhiso ujeeddooyinka waxbarashada Jaamacadeedka, sida waafaqsan xeerkan.
4. Haddii axdiga lagala noqdo sida ku xusan faqrada 1-aad, Wasiirku wuxuu isla markiiba ogeysiiska la noqoshada lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah a Jaamacada ay khusaysana waxay shaqadeeda Jaamacadnimo ku soo xiraysaa muddo hal sano

laga soo bilaabo taariikhda ogeysiinta.

5. Ka sokow faqrada 4-aad, la noqoshada axdiga sinaba uma saamayn doonto ansaxnimada marag-aqooneed kasta oo akadeemi ah oo ay jaamacaddu bixisay ka hor intaan lala noqon axdiga.
6. Marka lala noqdo axdiga, wasiirku isagoo la tashanaya guddiga marka ay Jaamacadu tahay mid dawladeed, ama guddiga iyo maalgeliyaha (sponsor) haday Jaamacadu tahay mid gaar, wuxuu magacaabi karaa qof ama dhowr qof oo uu arko inay ku habboon yihiin inay sii maamulaan Jaamacadda, si loo dhawro danaha ardayda iyo hawlwadeennada Jaamacadda.
7. Wasiirku isagoo la tashanaya Guddiga, ayuu wuxuu samayn karaa xeer hoosaadyo, si kor loogu qaado socodsiinta hawlaha sida ku xusan xeerkan.

## Qodobka 23-aad

## Xeerar dhaqangal ah

1. Sida uu dhigayo xeerkan, iyo axdigu, golaha jaamacaddu iyo meeshii looga baahdo xeerkan waxay samayn doonaan xeer hoosaadyo hadday u arkaan mid ku habboon inay nidaamiso arrimaha Jaamacadda.
2. Golaha Jaamacaddu, marka ugu horaysa ee waxqabad suuroobi karo, waxa uu u gudbin doonaa Guddiga xeer hoosaadyada iyo nidaamyada ku xusan Qodobkan, ka dib marka uu dhameeyo muddo saddex bilood aan ka badnayn, wasiirkuna wuxuu ku daabici karaa xeerhoosaadyadan faafinta rasmiga markay ku talo bixiyaaan Guddiga tacliinta sare.

## Qodobka 24-aad

## Adeegsiga Magaca Jaamacadda aan lahayn oggolaansho Waafaqsan Qaanuunka.

1. Qofkii isagoon oggolaansho qoraal ah ka haysan golaha Jaamacadda.

   b) u adeegsada magaca Jaamacadda inuu ku sii dhiirri geliyo wax la xiriira xayeysiin ganacsi, ama wax la mid ah.

   t) soo saara shahaadooyin uu ku andacoonayo in ay ka soo baxeen jaamacadaa, wuxuu galay dembi haddii ay ku cadaato, isla markaana wuxuu mudan yahay ganaax aan ka badnayn $ 10.000 (toban kun oo dollar) ama xabsi ah ugu badnaan 3 sano ama labadaba.

2. Ka sokow Xeer kale oo qoran, ma jiri karo sarkaal dawladeed oo gudanaya shaqadiisa la xiriirta diiwaanglinta shirkadaha (companies), magacyo ganacsi, calaamado ganacsi oo oggolaan doona inuu diiwaangeliyo magac la mid ah ama u eg kan Jaamacadda si ay ugu jahwareeriyaan dadweynaha magaca Jaamacadda, ama kulliyadaha faraca ah ilamaa oggolaansho uu ka helo golaha Jaamacadda, ama golaha kulliyadda ay khusayso.

## Qodobka 25-aad

## Aqoonsiga jaamacadaha dibedda.

1. Jaamacad lagu aasaasay meel ka baxsan Puntland oo doonaysa inay Puntland ka bixiso waxbarasho Jaamacadeed waa in ay codsi u qorataa Guddiga Tacliinta Sare (GTS) si ay aqoonsi u hesho si waafaqsan Xeerkan.
2. Jaamacad kata oo dibad ku taal, sida ay qabaan qodobada xeerkani, waxay heshiis la geli kartaa hay'ad waxbarasho oo gudaha Puntland ku taal iyadoo ujeedadu tahay bixinta barnaamijyadeeda waxbarasho ama inay iskaashi ku wada bixiyaan barnaamijyada waxbarashada, markay jirto oggolaanshaha hore ee guddiga.
3. Jaamacadd kasta oo laga leeyahay meel ka baxsan Puntland ee lagu ansixiyo sida ku xusan Faqrada 2aad waa in ay ka keentaa dalkeeda caddayn aqoonsi (accreditation) si adeegeedu uga ambaqaado Puntland.

## Qodobka 26-aad

## Madaxbanaanida akedeemiga ah

1. Jaamacaddu markay gudanayso hawsheeda waxay yeelan doontaa: -

   b) Xuquuq iyo xil ay ku ilaaliso isla markaasna sare ugu qaado mabaadii'da soo jireenka ah ee madax-banaanida akaadeemiga, taasoo ka muuqanaysa hab dhaqankeeda arrimaha gudaha iyo kan dibedda ee jaamacadda.

   t) Awood ay isugu du'do arrimaheeda si waafaqsan dhaqan madax-bannaan, iyadoo u toogo haynaysa markay arrintaas samaynayso.

   i. Sare u qaadida iyo ilaalinta u sinnaanta fursadaha iyo helidda.
   ii. U adeegsiga hantida si wax ku ool ah oo farsamo ka muuqato, iyo
   iii. U heellani inay u qoollan tahay la xisaabtanka dadweynaha.

2. Xubintii ka midka ah hawlwadeennada Jaamacadda waxay leedahay madax bannaani Xeerkanu jideeyey dhinaca wax barista, cilmi baarista iyo firfircoonaanta kale ee gudaha Jaamacadda iyo dibeddeedaba, sida tijaabinta murti soo gaartay, ama dibed soo dhigid fikrado cusub iyo qeexid fikir, wax dhimaal ama saluugmo

ahna lagulama kici karo xubintu hadday madax-banaanidaas ku faa'iidaysato ama ku isticmaasho (exercise).

## QAYBTA IV
## XUKUNKA IYO MAAMULKA JAAMACADAHA

### Qodobka 27-aad
### Xeerarka xukunka

Sida ay qabaan qodobada xeerkan, Jaamacadda waxaa lagu maamulayaa si waafaqsan qodobada axdiga loo ansixiyey sida ku xusan xeerkan, iyo xeerar hoosaadyada ay sameeyeen golaha jaamacaddu.

### Qodobka 28-aad
### Xubnaha xukunka ee Jaamacadda

1. Jaamacaddu waxay samayn doontaa xubnaha xukunka ee soo socda ama dhigooda:-
   b) Gole, kaasoo
      i. Qoraya hawlwadeenada,
      ii. Meel marinaya xeerhoosaadyada Jaamacadda, una oggolaanaya in lagu faafiyo jariiradda rasmiga ah.
      iii. Meelmarinaya siyaasadaha Jaamacadda.
      iv. Meel marinaya miisaaniyadda.
      v. Markay tahay Jaamacad dawladeed, wuxuu talo bixin siinayaa wasiirka si uu u magacaabo gudoomiye ku xigeenka Jaamacada (Vice-Chancellor) iyo kaaliyaha guddoomiye ku xigeenka, iyo
      vi. Qabanayaa shaqooyinka kale oo loo asteeyey si waafaqsan xeerkan iyo axdiga.
   t) Golaha guurtida (Senate) kaas oo mas'uul ka noqon doona hawlaha akaadeemiga ah oo Jaamacada oo dhan. wuxuu kaloo qaban doonaa shaqooyinka kale oo axdigu u qoondeeyey.
   j) Golaha maamulka Jaamacadda, kaasoo: -
      i. Mas'uul ka noqon doona dhaqangelinta siyaasada Jaamacadda.
      ii. Gargaaraya maamul maalmeedka Jaamacadda, iyo
      iii. Qabanaya shaqooyin kale ee axdiga lagu dejiyey.
2. Ka sokow guudmarka faqrada 1-aad, golaha Jaamacadda gaarka ah waxaa magacaabi doona gardaadiyaha ama maalgeliyaha (sponsor), Jaamacaddaas oo kale, markay oggolaadaan guddigu, waxay samayn kartaa xubno xukun oo

dheeraad ah, ayna ku jiri karaan golaha siyaasad dejintu ama wax u dhigma markay u muuqato inay waxtarayso.

3. Gardaadiyayaasha (sponsors) Jaamacadda dawladeed-gaarka ah waxay magacaabi doonaan golaha siyaasad dejinta Jaamacadda (board of trustees), kuwaasoo ka koobnaan doona xubno aan ka yarayn toddoba, kana badnaan karin sagaal xubnood.
4. Gardaadiyaha Jaamacadda gaarka ah, ama golaha siyaasad dejinta ee Jaamacad guud/gaar waxay marka lagu daro shaqo walba ee ku xardhan axdiga: -

   b) Magacaabi doonaan xubnaha golaha Jaamacadda.
   t) U istaagi doonaan kaalmo soo ururin si ay jaamacaddu u dheefsato.
   j) Kor u qaadi doonaa ujeedooyinka Jaamacadda, iyo
   x) Waxay magacaabi doonaan guddoomiyaha Jaamacadda.

## Qodobka 29-aad

## Golaha Jaamacada dawladeed

1) Golaha Jaamacadda dawladeed, ama kulliyad farac ee Jaamacadaas oo kale, wuxuu ka koobnaan doonaa sagaal xubnood oo uu magacaabay wasiirku sida soo socota-;
   i. Guddoomiye;
   ii. Wasiirka wabarashada iyo tacliinta sare kaasoo noqonayaa xubin jagadeeda ku timid (ex officio).
   iii. Hal qof oo metelaya wasaarada waxbarashada iyo tacliinta sare, kaasoo noqon doona xubin jagadeeda ku timid.
   iv. Shan xubnood oo uu magacaabo wasiirka waxbarashada, kuwaasoo aqoon durugsan u leh tacliinta sare iyo samaynta siyaasadaha dawladda ee la xiriira tacliinta sare.
   v. Ku xigeenka guddoomiyaha (Vice-Chancellor) Jaamacadda oo noqonaya xubin jagadeeda ku timid.
2) Qodobada xeerarka la xiriira marag-aqooneedka u qalma guddoomiyaha, iyo xubnaha guddiga ee ku xusan qaybta 7-aad ayaa loo cuskan doonaa magacaabista guddoomiyaha iyo xubnaha lagu magacaabay sida ku xusan faqrada 1-aad, marka lagu sameeyo isbedelada loo baahan karo.
3). Xeer-hoosaad wata is bedellada loo baahdo ayaa lagu dhaqangelin doonaa wixii la xiriira anshaxa shaqada Golaha.

## Qodobka 30-aad

## Guddiyada

Xubnaha maamulka Jaamacadu waxay samayn karaan guddiyo haday habboon tahay si ay u gutaan shaqooyin, xilalna u bixiyaan markay haboonaato, taasi waa haddii aysan xubnuhu awoodoodii asaasiga ahayd aysan u ergaynayn guddiyadaas.

## Qodobka 31-aad

## Guddoomiyaha

1. Jaamacad walba waxay yeelanaysaa guddoomiye, kaasoo uu/ay magacaabi doono/doonto: -
    b) Madaxweynuhu, hadday Jaamacad dawladeed tahay si waafaqsan habka ku xusan nidaamka ku qotoma Xeerkan.
    t) Si waafaqsan axdiga Jaamacadda, markay Jaamacadu tahay mid dawladeed gaar (mid wadaag ah).
2. Madaxweynaha Jaamacad dawladeed wuxuu xafiiska joogayaa muddo shan sano ah, wuxuuna mudnaan karaa in dib loo magacaabo muddo kale oo shan sano oo kama dambays ah.
3. Madaxweynaha Jaamacaddu: -
    b) Wuxuu noqon doonaa madaxweyne sharafeedka Jaamacadda, wuxuuna magaca Jaamacadda ku bixinayaa marag-aqooneedyo (shahaadooyin) isugu jira digrii ah, diboloomooyin, caddaymo iyo abaalmarino (awards) kale ee Jaamacadda.
    t) Wuxuu goor ilaa goor talo bixin ku siin karaa wasiirka haday jaamacad dawladeed tahay, iyo gardaadiyaha (sponsor) ama golaha siyaasad dejinta haday Jaamacad dawladeed- gaar (mid wadaag ah) tahay samaynta kormeero Jaamacadeed.
    j) Wuxuu goor ilaa goor talo bixin ku siin karaa Golaha, hadba waxyaabaha uu arko inay lagama maarmaan u tahay sii wanaajinta Jaamacadda.
    x) Wuxuu ku faajfaajoon (enjoy) doonaa awoodahaas oo kale iyo amaan (previlages), isla markaana wuxuu gudanayaa shaqooyinkaas oo kale ee uu siin karo axdigu.
4. Qofka waxaa loo magacaabi karaa Madaxweyne haddii uu qofkaasi leeyahay dhaqan asluub sare leh, Sharaf, isla markaana leeyahay waayo aragnimo balaaran ee dhinaca tacliinta sare.

## Qodobka 32-aad

## Guddoomiye ku xigeen

1) Gudoomiye ku xigeenka Jaamacadda waxaa magacaabi doona: -

b) Wasiirka si u tartan ah markuu goluhu ku talo bixiyo, haday tahay Jaamacad dawladeed.
t) Golaha Jaamacadda si waafaqsan axdiga Jaamacadda, hadday Jaamacadu tahay mid gaar ah ama mid dawladeed/gaar (mid wadaag ah).

2. Guddoomiye ku xigeenka Jaamacadu waa madaxa fulinta ee Jaamacadda wuxuuna:-

b) noqon doonaa madaxa akaadeemiga iyo maamulka Jaamacadda.
t) Yeelan doonaa mas'uuliyada guud ee jeedinta (direction), maamuka iyo barnaamijyada Jaamacada.
j) Yeelan doonaa xilalka iyo waajibaadka uu bixin karo axdigu.

2. Guddoomiye ku xigeenka Jaamacadu wuxuu xafiiska hayn karaa muddo shan sano ah, wuxuna mudan yahay in loogu daro muddo kale shan sano keliya ah.
3. Muddada xilhaynta gudoomiye ku xigeenka Jaamacada gaarka ah ama mid dawladeed-gaarka ahi waxay noqon doonaan sida uu muujiyo axdiga Jaamacadda.

## Qodobka 33-aad

## Hawlwadeenada Jaamacada

Hawlwadeennada akaadeemiga iyo kuwa maamulka Jaamacadda waxay noqon doonaan sida ku cad axdiga.

## Qodobka 34-aad

## Ururka Ardayda

1. Jaamacad walba waxay yeelan doontaa urur arday.
2. Urur walba ee arday wuxuu dooran doonaa golaha ardayda Jaamacada, kaasoo shaqadiisu noqon doonto: -

b) Inuu kor joogteeyo, qorsheeyo isagoo la tashanaya golaha guurtida waxqabadyada ardayda si kor loogu qaado noloshooda maskaxeed, aqooneed, anshax iyo bulsho wanaag.
t) Inay ku soo jeediyaan indhaha maamulka ku habboon, baahida ardayda gaarka ah marka loo baahdo.

j) Inay u soo jeediyaan golaha guurtida ama kuwa la midka ah waxyaabaha saamaynta ku leh nolol wanaaga ardayda, iyo

x) Inay qabtaan wixii kale oo hawl ah ee uu muujinayo xeerarkeeda maamulka ay goluhu ansixiyeen.

## Qodobka 35-aad

## Ururka Qalin-jebiyayaasha

1. Jaamacadi waxay samaysan kartaa ururka qalinjebiyayaasha, kuwaas oo ka koobnaanaya ardaydii ka qalin jebisey Jaamacadda iyo dad kale oo axdigu xubno u aqoonsaday.
2. Ururka ardaydu wuxuu u dhaqmi doonaa sida gole isdhexgal ah oo ay ku kulmaan xubnuhu sida ku xusan faqrada 1-aad, isla markaana ay gutaan shaqooyinkaas oo kale sida uu muujin karo axdiga jaamacadda.

## Qodobka 36-aad

## Maamulka Jaamacadda.

Maamulka maalinlaha ah ee jaamacaddu waxaa yeelanaya guddoomiye ku xigeenka (vice chancellor), kaas oo golaha maamulku ay ku gargaari doonaan sida waafaqsan qodobada xeerkan iyo axdiga.

# QAYBTA V-QODOBO GUUD EE MAALILYADA EE LA XIRIIRA JAAMACADAHA

## Qodobka 37-aad

## Kaalmada Xukuumadda

Xukuumaddu waxay ku dedaali doontaa inay bixiso gargaar mood iyo maalgashiba leh si loo horumariyo waxbarashada jaamacadaha dalka.

## Qodobka 38-aad

## Qiyaas sanadeedka dakhliga iyo kharashka jaamacadaha dawlad wadaagga iyo kuwa gaaarka loo leeyahay

1. Jaamacad dawladeed iyo mid wadaag ah (dawladeed-iyo gaarba) waxay diyaarin doontaa, una gudbin doontaa wasiirka, iyo Guddiga siyaasad dejinta (board of trustees) si ay u odorasaan qiyaasaha (estimates) dakhliga iyo kharashaadka

sannadlaha ah si loogu ansixiyo qaab waafaqsan nidaamka oo ay xilli ka xilli cayimaan wasiirka iyo Guddiga siyaasad dejintu (board of trustees).

2. Oggolaanshaha Guddiga ka hor, jaamacad dawladeed iyo mid ah wadaaga "dawlad-iyo-gaar" ahba, waxay geli kartaa kharashaad ay ku socodsiinayso hay'adda, si waafaqsan qiyaasta uu ansixiyey wasiirku ama Guddiga dejinta siyaasada, isla markaasna madax-kharasheed kasta walba uusan ka badan qoondadiisa hore ee loo dejiyey.
3. Jaamacad dawladeed, ama mid wadaaga "dawlad-gaar' ahba, sida ay ugu qotanto xeer kasta oo kale oo qoraal ah, xeerar gaar ah iyo nidaamyo kale, waxay dadweynaha weydiisan karaan guud ahaan deeqo, qaaraan iyo hibooyin waxtar u ah Jaamacadda.

## Qodobka 39-aad

## Deeqaha Jaamacadda dawladeed.

Qoondayn dhaqaale ee Jaamacadda dawladeed iyo mid wadaag "dawlad-gaar" ahba waxay ka koobnaan doontaa: -

b) lacagaha ugu jira qoondada miisaaniyadeed ee Baarlamaanku ansixiyey.
t) Lacagaha ama hantida u ururtay, ama ay maal-gashatay Jaamacad dawladeed, wakhtiyadii ay adeegsanaysey awoodeheeda, ama gudashada xilalkeeda sida ku xusan xeerkan, ama xeer kale oo qoraal ah, iyo
j) Dhammaan lacagaha ka yimid ilo kale oo la siiyey, loogu deeqay, ama la amaahiyey Jaamacad dawladeed.

## Qodobka 40-aad

## Lacagaha aan la isticmaalin

Haraa walba oon la filayn oo ka yimaada deeqaha la helay sida ku xusan Qodobka 39-aad waxaa lagu darayaa xisaabta Jaamacad dawladeed ama mida ay wadaagaan 'dawlad iyo dad gaar' ahba ee sannadka xiga, isla markaasna Jaamacaddu waxay ku bixin kartaa kharashka ay gasho.

## Qodobka 41-aad

## Xisaabaadka iyo handti-dhawrka

1. Jaamacad dawladeed ama mida wadaaga 'dawlad-gaar' ahba waxay keydinaysaa dhammaan raad-reebka (records/books) xisaabaadka dakhliga, kharashaadka iyo hantida Jaamacadda.
2. Xisaabaadka Jaamacad dawladeed iyo mida wadaaga 'dawlad-gaar' ahba waxaa la

marsiinayaa hanti dhawr, isla markaana waa laga warbixinayaa si waafaqsan qodobada xeerkan.

## Qodobka 42-aad
## Masuuliyadda hantida

Dhammaan hantida ma guurtada ah, saamiyada, lacagaha, warqadaha damaanadda oo xilli ilaa xilli (from time to time) noqon karta hanti Jaamacad dawladeed ama mida wadaaga 'dawlad-gaar' ah waxaa lagu diiwaangelinayaa magaca Jaamacada, waxaana loola dhaqmi doonaa sida hadba ay hay'addu go'aamiso xilli ilaa xilli, iyadoo la raacayo shuruudihii deeqdaas lagu bixiyey inay noqoto mid la keydiyo ama mida loo adeegsanayo kharashyadda soo noq-noqda, ama mid lagu bixiyo shuruudaha waqafyadda, hibooyinka, iyo deeqaha ujeedo kasta hay'addu ha ka yeelatee.

## Qodobka 43-aad
## Maalgelinta lacagta

1. Jaamacad dawladeed ama mid wadaaga 'dawlad-gaar' ha noqotee waxay u maalgashan kartaa lacageheeda hadba sida uu wasiirku ama Guddiga siyaasad dejintu u ansixinayaan.
2. Jaamacad dawladeed iyo mid wadaag ah, iyadoo ku xiran oggolaanshaha wasiirka ama Guddiga siyaasad dejinta (board of trustees) ama hay'adii kale ay khuseyso oo awood ku leh waxay ku keydsan karaan bangiyada haday u arkaan inay habboon tahay.

## Qodobka 44-aad

## Sanad Maaliyadeed

Sannad maaliyayeedka Jaamacad dawladeed ama midda wadaaga 'dawlad-gaar' ahba wuxuu noqonaaa 12 bilood oo ku bisha December sannad walba.

## Qodobka 45-aad
## Maamulka maaliyadeed ee Jaamacadaha gaarka ah

1. Jaamacad walba oo gaar ah oo isticmaaleysa sida waafaqsan mabaadii'da xisaabaadka guud laysla wada oggol yahay iyo habraacyadda: -

   b) Waxay keydinaysaa xisaabaha iyo diiwaannada wixii soo galay, wixii baxay, hantida taal iyo deymaha.

t) Diyaarinta warbixin xisaab-celin maaliyadeed oo lagu soo dhameystirayo saddexda bilood ee ugu dhambeysa sannad maaliyeedka oo ay ku jiraan

i. Warqadda xisaab celinta dakhliga iyo kharashka ee sannadkii tegey, iyo
ii. Xaashida haraaga (balance sheet) dhammaadka sanadkii tegey.

2. Jaamacad walba ee gaar ah, waxay sannad walba oo maaliyadeed: - _

i. Hubin doontaa in hantidhawr sannadle ah lagu xaqiijiyo buugteeda, diiwaanadeeda xisaabta iyo xisaab xirkeeda sannadlaha ah ee uu ka hawlgalo hanti-dhowre aqoonsi leh, kaasoo hawsha u qaban doona si waafaqsan halbeegyada hantidhawrka ee guud ahaan laysku wada raacsan yahay.
i. Guddoonsiiso maalgeliyaheeda nuqul warbixinta oo xeer qaanuunka lagu ansixiyey (certified) sida lagu tilmaamay faqrada 1-aad.
ii. U hoggaansanto dhammaan xeerarka maaliyeed iyo waajibaadka maaliyadeed ee Dawladdu ku leedahay si waafaqsan qodobada xeerarka kale ee qoran.
iii. Ka xisaab baxdo dhammaan lacagaha xukuumaddu ku leedahay.
iv. Marka laga codsado iyo iyadda oo loo tixgelanayo ujeeddooyinka aqoonsiga (accreditation) daraadeed, inay Guddiga Tacliinta Sare u gudbiso hubaal (confirmation) rasmi oo muujinaya u hoggaansanida waajibaadkeeda maaliyadeed, taasoo aan la faafin karin iyada oon oggolaansho laga helin Jaamacadda.

### Qodobka 46-aad
### Maalgashiga hantida ee Jaamacadaha gaarka ah

Jaamacadda gaarka ahi way maal-gashan kartaa xooleheeda intay doonto, taasoo uu oggolaan karo maalgeliyeheedu ama ciddii u dhiganta.

## QAYBTA VI- ASAASIDA HAY'ADAHA TABABARADA

### Qodobka 47-aad

### Shuruudaha diiwaangelinta

1. Ma jiri karo qof ama kulliyad farsamo oo Puntland ka bixin karta marag-aqooneed jaamacadeed ama tababaro ilamaa qofkaas ama hay'addaas tababareed laga aqoonsanayo, ruqsad la siinayo, islamarkaasna la diiwaangelinayo sida ku xusan xeerkan.
2. Ka sokow qodobada xeerkan sida ku xusan faqrada 1-aad, qof kasta iyo hay'ad kasta oo horay tababaro kulliyad farsamo uga bixinaysay Puntland laga bilaabo markii xeerkan dhaqangal noqdo, waxay muddo hal sano gudaheed ah codsi ugu

gudbinayaan Guddiga Tacliinta Sare si ay u helaan aqoonsi, diiwaangelin iyo ruqsad sida ku xusan xeerkan.

3. Wax barnaamij ah ama maadooyin (courses) tababar ay bixin karto hay'adi ma jiri karo ka hor intaysan oggolaansho ka helin Guddiga Tacliinta Sare, islamarkaasna lama aqoonsanayo marag-aqooneedyadda ama abaalmarinadda akaadeemi oo ay bixisay hay'ad aan weli la aqoonsan, lagana diiwaangelin Puntland; lamana tixgelin doono sida ku xusan Xeerkan.
4. Qof kasta oo ka hor-yimaada qodobka 47-aad ee Xeerkan wuxuu gelayaa dembi haddii ay ku cadaato, isla markaana wuxuu mutaysanayaa ganaax lacageed ugu badnaan $ 10.000 (toban ku oo Dollar) ama xabsi gaaraya ugu badnaan 3 sano ama labadaba.

## Qodobka 48-aad

## Codsi diiwaangelin

1. Qof kasta oo doonaya in uu tababaro ka bixiyo heerka kulliyada farsamada Puntland wuxuu codsi qoraal ah u gudbinayaa guddiga, iyagoo raacaya qaab uu xeerkani tilmaamayo.
2. Codsiyada sida ku xusan faqrada 1-aad, waxaa la soo raacin doonaa qoraal muujinaya waxyaalahan soo socda:-
   - b) magaca, iyo cinwaanka hay'adda (xarunta waxbarasho) la soo jeedinayo.
   - t) qalfoofyadda xukunka iyo maareynta hay'adda.
   - j) xubinimada hay'adda codsiga soo jeedisay.
   - x) ujeeddooyinka loo asaasayo hay'adda, barnaamijyada waxbarineed iyo maadooyinka waxbarasho ee ka bixi doona.
   - kh) tirada, marag-aqooneedka (qualifications) iyo kartida tababareyaasha.
   - d) kala-dhig-dhigida (layout), naqshadaha, muujiyaasha kaabayaasha la heli karo iyo qalabka.
   - r) qoraal muujinaya ku habboonaanta, lahaanshaha, ama heshiisyadda kiro ee la galay goobaha la adeegsanayo si ay marag uga noqoto qaabkooda dhisme iyo habsimadda ay u waafaqsan yihiin qodobada xeerarkan.
   - s) qoraal muujinaya itaalkooda maaliyadeed iyo lacagaha ardayda laga qaadayo, iyo
   - Sh) Arrimo kale oo lagu qeexi karo xeerhoosaadyada laga soo dheehan karo xeerkan.

## Qodobka 49-aad

## Ka baaraan degidda codsiga

1. Guddigu Tacliinta Sare wuxuu saddex bilood gudahood markuu qabto codsiga sida ku xusan Qodobka 48-aad :-

   b) baaritaan ku samayn doona waraaqaha la soo gudbiyey, islamarkaana
   t) wuu kormeerayaa, oo qiimaynayaa agabka loo diyaariyey in loo adeegsado hay'adda tababarka la soo jeediyey.

2. Guddigu Tacliinta Sare wuxuu diyaarin doonaa warbixinta aqoonsiga oo faahfaahsan, dabadeedna wuxuu ku soo celin doonaa codsadaha.

## Qodobka 50-aad

## Diiwaangelinta iyo Oggolaansho siinta kulliyadaha farsamo

1. Marka Guddigu ku qanco in codsaduhu uu dhammaystiray dhammaan shuruudihii lagu asaasi lahaa Kulliyada Tababaradda Farsamadda, waxay geliyaan diiwaanka faafinta hay'adaas, iyagoo siinaya hay'addaas warqad oggolaansho si ay u muujin karto inay ruqsad u haysato bixinta tababarradda qaabka loo tibaaxay, oo uu dejiyey guddigu.
2. Marka Guddigu qabo aragtida ah in aan codsiga lagu soo dhammaystirin shuruudihii lagu asaasi lahaa hay'adan, waxay:-

   b) Diidi karaan codsiga; ama
   t) waxay bixin karaan faallo ama tallooyin, kuwaasoo ay u gudbinayaan codsadaha.

3. Codsadaha, codsigiisa faallo looga soo gudbiyey si waaafaqsan faqrada 2-aad (b), wuxuu dib u soo gudbin karaa codsigiisa lix bilood gudohood.

## Qodobka 51-aad

## Go'aan ka gaaridda codsi lagu noqday

Markay helaan codsi dib loo saxay sida ku xusan 48.3-aad, Guddigu wuxuu, muddo saddex bilood gudahood lagana bilaabayo maalintii arjiga laga qabtay, go'aaminayaa in arjigu waafaqsanyahay xeerkan, isla go'aan qaadashadaas, haddii ay ku qancaan, waa la diiwaangelinayaa, warqad markhaatikac ahna waa la siinayaa hay'addaas si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 52-aad

## Racfaan laga Qaato Diidmo

Qofkasta oo tabasho ka sheeganaya go'aanka Guddiga Tacliinta Sare sida ku xusan qodobkan wuxuu, soddon beri gudohood marka laga soo bilaabo markii lagu wargeliyey go'aanka, uu racfaan (appeal) lid ku ah go'aanka u gudbin karaa Wasiirka.

# QAYBTA VII
# HALBEEGYADA, TAYADA IYO KU HABOONAANTA TABABARKA

## Qodobka 53-aad

## Halbeegyada Tababarada

1. Iyadoo ujeedooyinku yihiin hubinta halbeegyada, tayada iyo habboonida tababarada, Guddigu wuxuu:-
    b) Curinayaa halbeegyo iyo hagayaasha tababarka.
    t) Maamulayaa siyaasado iyo xeerar lagu abuuray si waafaqsan xeerkan, ama xeerar kale oo qoran si loo meelmariyo asaasida iyo aqoonsiga hay'adaha tababarada si waafaqsan xeerkan, iyo
    j) Hubin doonaa ku dhaqmida halbeegyada, tayada iyo ku habboonaanta dhammaan siyaabaha tababarka, kaasoo qayb ka ah habdhiska tababarka qaranka.
2. Guddigu isagoo la tashanaya daneeyayaasha wuxuu dejin doonaa xeerar la xiriirta dabeecadda iyo tayada agabyada ee laga yaabo in loo adeegsan karo ujeedooyinka hogaaminta kulliyadaha farsamada.

## Qodobka 54-aad

## Barnaamijyada Waxbarista ee kulliyada farsamada

Hay'ad bixinaysa tababaro farsamo, iyadoo oggolaanshaha ka heshay Guddiga Tacliinta Sare, waxay soo bandhigi kartaa, dib-u-eegis ama wax ka beddel ku samayn kartaa barnaamijyadeeda waxbarista ama maadooyinka (courses) waxbarashada.

## Qodobka 55-aad
## U kuurgalka iyo Qiimaynta Kulliyadaha Farsamada

1. Tababarku wuxuu noqon doonaa mid tayaysan, isla markaasina ku habboon wadciga, waafaqsana halbeegyaday dejiyeen Guddigu, isla markaasna hirgelinaya ujeedooyinka lagu qeexay xeerkan.
2. Hay'ad walba ee tababar bixisaa waxay dejinaysaa habdhisyo ku eg habdhisyadda gudaheeda (internal systems) oo lagu hubinayo ku dhaqanka halbeegyada, tayada iyo ku habboonanta barnaamijyada tababarada.
3. Guddigu wuxuu dejin doonaa tabaha (mechanisms) u-kuurgalka, qiimaynta adeegyada iyo barnaamijyada si waafaqsan xeerkan, si loo hubiyo halbeegyada, tayada, habboonanta marka lagu gudo jiro bixinta barnaamijyada iyo maamulidda ha'yadaha si aan kala joogsi lahayn.
4. Iyadda oo la higsanayo faqrada 3-aad, guddigu wuxuu samayn doonaa qiimayn kale ah (periodic) oo ujeedkeedu yahay in si joogto ah loogu kuurgalo, lana qiimeeyo tababarada ay bixiso hay'ad walba.
5. Ka sokow guud ahaanshaha faqrada 4-aad, Guddigu wuxuu ku oogayaa hanti-dhowr hay'ad walba lagu socodsiiyo markii loo baahdo.

## Qodobka 56-aad

## Magacaabida U kuurgalayaasha iyo Qiimeyayaasha

1. Ujeedooyinka Qodobka 55 faqradaha 3-aad iyo 4-aad dartood, Guddigu wuxuu magacaabi doonaa qiimeeyayaal iyo kuwa u-kuurgalayaal, iyadoo ujeedku yahay fulinta hawlaha qiimaynta iyo dabagalka.
2. Marka lagu gudo jiro hawlgalka qiimaynta iyo dabagalka sida ku xusan 55-aad, qiimeeyayaalku iyo u kuurgalayaashu waxay awood u yeelan doonaan inay su'aalo ka soo jeediyaan kaabayaasha, qalabka, barnaamijyada, tababareyaasha, ardayda, maamulka iyo wixii kale ee ku xiriira hay'adda, isla markaasna waxay adeegsan doonaan wax la mid ah hababka ama qaabab qiimaynnada lagu farmuuqay nidaamyo waafaqsan xeerkan ama xeerar kale oo qoran.
3. Markay dhammaystiraan qiimaynta iyo dabagalka sida ku xusan qodobkan, qiimeeyayaalka iyo dabagelayaashu waxay diyaarin doonaan warbixin iyagoo raacaya habka la farmuuqay, dabadeedna waxay u gudbinayaan Guddiga.

## Qodobka 57-aad

## Dembiga Horistaaga ama Arbushaada Dabagalka iyo qiimaynta

Qof walba oo diida, is-hor-istaaga, ama arbusha qiimeeyayaalka iyo dabagaleyaasha si ay u gutaan qiimayntooda wuxuu gelayaa dembi sida ku xusan xeerkan.

## Qodobka 58-aad

## Wargelin Qoraal ah

Guddigu Tacliinta Sare markuu wargelin qoraal ah siiyo, wuxuu uga baahan karaa hay'adda, inay si toos ah ugu hoggaansanto halbeegyada la dejiyey, wakhtiga la cayimay iyo habka loo asteeyey (prescribed).

## Qodobka 59-aad

## Xiridda Kulliyadaha Farsamada

1. Haddii hay'ad la siiyey wargelin qoraal ah sida ku xusan Qodobka 58-aad ay ku guuldaraysato inay u hoggaansanto wargelinta, Guddigu wuxuu xiri karaa hay'addaas oo kama dambeys ah (weligeed), ama ilaa ay wargelinta uga hoggaansamayso.
2. Qofkii wax ka tabanaya ama ku qanci waaya go'aanka guddiga sida ku xusan farqada 1-aad ee isla qodobkan, wuxuu racfaan (appeal) u qaadan karaa Wasiirka Wasaaradda Waxbarasada & Tacliinta sare muddo 30 bari gudahood ah.

## Qodobka 60-aad

## Halbeegyada Qaranka, kuwa caalamiga iyo Tayadhowrka

1. Hay'ad walba waxay sida waafaqsan qodobada xeerkan waxay_

   b) Joogteynayaan, qaadanayaan, hirgelinayaana tababaro ku salaysan halbeegyada qaran iyo kuwa caalamiga.

   t) Asaasaysaa, hirgelinaysaa, isla markaana maaraynaysaa habdhisyadda tayo dhowrka.

   j) Asaasaysaa isla markaasna waxay kor u qaadaysaa xiriirada iskaashiyadda qaran iyo caalami ee ku habboon halbeegyada iyo tayo dhowrka, iyo

   x) Asaasida habdhisyo iyo habraacyo joogtaynaya dib-u-eegista iyo sii hagaajinta halbeegyada iyo tayo dhowrka.

## Qodobka 61-aad

## Isku Aadinta Tababarada iyo Qalinjebiyayaasha cusub

1. Habdhisyada tababaradu waxay isku aadin doonaan hawl-qabadka heerarkeeda kala duwan iyo qalinjebiyayaasha cusub, si loo bixiyo tababarrada khuseeya oo suurtagelinaya horumarka farsamadda iyo cusboonaysiinta ku habboon.
2. Xeer-raacayaasha qaabilsan halbeegyada, tayada iyo habboonaanta oo loo sameeyey si waafaqsan xeerkan, waxaa hirgelin doona hay'adaha, wakaaladaha taya-dhowrka iyo nidaaminta tababarada iyo qofkii kale oo si toos ah ama aan toos ahaynba tababarada wadankan ku xiriirsan.

## QAYBTA VIII-
## XEERARKA MAALIYADDA EE LA XIRIIRA GUDDIGA Tacliinta Sare

## Qodobka 62-aad

## Hantida Guddiga Tacliinta Sare

1. Hantida Guddigu waxay ka koobnaan doonaan:-

b) Lacag baarlamaanku u qoondeeyey Guddiga shaqadiisa.
t) Gunnooyin ama khidmado adeeg oo ay qabteen guddigu si waafaqsan sharciga iyo qaanuunka dalka.
j) Lacagaha ka soo xerooda hawlo ganacsi oo dakhli abuur ah.
x) Lacago deeqo, hibooyin ah ama deyn loo siiyey Guddiga il-kasta ha ku yimaadeen, kuwaas oo ay oggolaadeen Wasiirka Waxbarashada iyo Wasiirka Maaliyaddu labaduba.

## Qodobka 63-aad

## Sannad maaliyadeed

Sannad Miisaaniyadeedka Guddigu waxa uu noqon doonaa muddo 12-bilood ah oo ku dhammaanaysa December.

## Qodobka 64-aad

## Qiyaasta sannadlaha

1. Ugu yaraan 3 bilood ka hor intaysan bilaaban sannad maaliyadeedku, Guddigu wuxuu farayaa xisaabyaha diyaarinta qiyaasta (estimate) dakhliga iyo kharashka sanadkaas.

2. Qiyaasta sanadlaha waxaa lagu jaangoynayaa dhammaan qiyaasta kharashaadka Guddiga, gaar ahaan waxay muujinaysaa: -

   b) Mushahaar bixinta, gunnooyinka, iyo kharashaadka kale ee la xiriira hawlwadeenada Guddiga.
   t) Bixinta hawlgabka (pension), abaalmarinada, iyo kharashaadka kale ee la xiriira lacagaha laga bixin karo Miisaaniyada Guddiga.
   j) Dayactirka hantida Guddiga.
   x) Maalgelinta hawlgallada, tababarada, cilmi barista, horumarinta iyo hawl-qabadyadda Guddiga, iyo
   Kh) Abuurista keyd si wax loogu qabto mustaqbalka, deymaha la xiriira dhaqaalaha ku baxa shaqaalaha, caymiska ama bedelaadda iyo dayactirka dhismayaasha, qalabka iyo siyaabaha waxyaaba kale ee guddigu u macneeyo inay sax tahay.

3. Qiyaasta sanadlaha ah waxaa ansixin doona Guddiga, inta uusan bilaaban sannad maaliyadeedka cusub oo ay la xiriirto, waxaana loo gudbin doonaa wasiirka si uu u ansixiyo, isla markaas haddii wasiirku aanu ansixin, Guddigu awood uma laha in ay ku dhaqan-geliyaan wadarta ku soo baxday qiyaasta iyadda oon oggolaansho laga qaadan wasiirka.
4. Wax kharashaad ah oo ujeedo ku saabsan leh lama geli karo, marka laga reebo wixii waafaqsan lacagta uu oggolaaday Barlamaanku.

## Qodobka 65-aad

## Xisaabaadka iyo Hanti-dhawrka

1. Guddigu wuxuu jideynayaa in la ilaaliyo lana keydiyo dhammaan buugta iyo diiwaannada dakhliga, kharashka, hanti iyo qaamaha Guddiga.
2. Muddo saddex bilood gudahood ah markuu dhammaado sannad maaliyadeedku Guddigu wuxu u gudbinayaa Xisaabiyaha Dawladda iyo Hanti-dhawrka Guud iyo ee xisaab xirka sannadkaas oo ay la socdaan:-

   b) Warbixinta xisaab xirka dakhliga iyo kharashka guddiga ee sannadkaas.
   t) Warbixinta Xisaab xirka Hantida ma'guurtada ah iyo qaamaha guddiga ee maalintii u dambaysay sannad maaliyadeedkaas.

3. Xisaabaadka sannadlaha ee Guddiga waxaa loo diyaarin doona, loo hanti-dhawri doonaa isla markaasina looga warbixin doonaa si waafaqsan xeerka.

## QAYBTA IX-
## XEERAR GOOSGOOS AH

### Qodobka 66-aad

### Shaabad u Dhex ah

1. Sida uu qabo xeerkan, shaabadda u dhex ah:-

   b) Guddiga
   t) Jaamacad; iyo
   j) Hay'adaha tababarrada

ayaa lagu hayn doonaa hadba sida hay'addu ku amar bixiso, lamana adeegsan karo marka laga reebo sida ay hay'adu oggolaansho Xeerka ugu bixin maahee si kale.

### Qodobka 67-aad

### Ka Ilaalinta Qaandhabid Shakhsiyadeed

Wax kasta oo uu ku kaco qof xubin ka ah Guddiga, Jaamacad ama kulliyad farsamo ama sarkaal kasta, hawlwadeen, ama wakiil haduu shaqadiisa iyo awoodihiisa u gudanayo si niyad sami ah ma gayeysiin doonto (u soo jiidi doonto) xubinta, sarkaalka, hawlwadeenka, ama wakiilka ama qof kale oo xilkiisa ku gudanaya isdiristiisa inuu si shakhsiyan ah ugu qoolnaado fal, sheegasho ama dalab, wax kasta ha noqotee.

### Qodobka 68-aad

### U Qoolnaanta Waxyeellooyinka

Qodobka 67-aad ee xeerkan kama qaadeyso hay'ada inay ka gar baxdo waxyellada dhacday, inay siiso magdhaw qof walba oo dhaawac ku soo gaaro naftiisa ama hantidiisa, ama qof walba danihiisu saameyn xumi ka soo gaartay isagoo isticmaalaya awoodihiisa uu xeerkani siiyey, ama Xeer kale oo qoran, ama fashal ku yimaada qayb ahaan ama guud ahaan shaqooyinka.

## Qodobka 69-aad.

## Ganaaxyo guud

Qof walba oo sheeganaya inuu marag-aqooneed (shahaado/digrii) ku bixiyo Jaamacad aan la aqoonsan wuxuu mudanayaa, markay cadaato, ganaax aan ka yarayn USD 10,000 (tobon kun oo doolar) ama xabsi mudo aan ka yarayn 3 sano, ama labada oo laysugu daro.

## Qodobka 70-aad

## Xeerhoosaadyo (nidaamyo)

1. Wasiirku isagoo la tashanaya Guddiga wuxuu samayn karaa xeerhoosaadyo astayn kara wax walba oo laga dheehan karo xeerkan, iyo guud ahaan arrimo iyo ujeedooyin si ka wanaagsan lagu hirgelin karo xeerkan.
2. Iyadoon oon wax loo dhimin (without prejudice) guud-marka waxyaabaha hore loo soo sheegay, nidaaminta ku xusan Qodobkan waxay samayn kartaa xeerar dheeraad ah oo la xiriiira:-

b) asaasida hay'adaha tacliinta sare.
t) qaab-dhismeeyada xukun iyo maamul ee hay'adaha tacliinta sare.
j) habraaca soo saarista, burinta iyo wax kala duwaanshaha qaybaha axdiga.
x) aqoonsi iyo tayo-dhawrka joogta ah, oo ay ku jirto aqoonsiga barnaamijka.
kh) habraaca burinta warqadda awoodda ku meelgaarka ah, wax ka beddelida, burinta axdiga, iyo xiritaanka jaamacadaha.
d) diiwaan-gelinta wakiillada jaamacadaha dibedda iyo kulliyadaha farsamada.
r) aqoonsiga jaamacadaha dibedda.
s) iskaashiga la gelida jaamacadaha dibedda.
sh) horumarinta manhajka, qiimeynta, bixinta marag-aqooneedka kulliyadaha farsamadda iyo tabararada.
dh) naqshadaynta/habeynta iyo horumarinta manhajka ku salaysan awood xirfadeedka ee hay'adaha tababarada tacliinta sare.
c) Is-xukunka jaamacadaha gaarka ah.
g) soo saarista oggolaanshaha kumeel gaarka ah ee kulliyadaha farsamada.

# QAYBTA X-XEERARKA KU MEEL GAARKA AH

## Qodobka 71-aad

## Hay'adaha Jira

1. Marka uu bilowdo xeerkan, wasiirku wuxuu noqon doonaa guddoomiye Guddiga tacliinta sare muddada kala guurka oo ah 2 sano, ama muddo kale lagu sii kordhiyey haddii loo baahdo si loo magacaabo guddoomiye u qalma.
2. Inta lagu jiro, muddada kala guurka oo lagu xusay faqrada 1-aad, waxaa dhici doona sida soo socota:

b) Xubnaha hay'adda oo joogey ka hor intuusan dhaqan-gelin xeerkan, waxay sii wadi doonaan shaqooyinkoodii ilamaa laga soo dhiso xubnaha lagu tilmaamay xeerkan.

t) Dadka hoggaanka ka ah hay'adaha ka hor intuusan dhaqangal noqon xeerkan, waxay sii wadi doonaan xilalkooda, waxay wadan doonaan isticmaalka awoodahooda sida ku qoran cadeymihii lagu shaqo-geliyey, ilaa si mug leh wax loo soo magcaabayo sida ku xusan xeerkan.

j) Marka laga reebo hay'adaha jirey, dhaqangaleyna xeerkan ka hor, wuxuu qof kasta oo xubin ka ahi tilmaamaayaa lagama maarmaarnimada magacawga dhammaan hoggaankoodii hore kadib dhaqangalka xeerkan.

x) Dhammaan hantida guurta ah ama mida maguurtada ah, taasoo ka hor dhaqangalka xeerkan, ay gaar u lahayd hay'addu, waxay ku sii jiri doontaa lahaanshaha hay'addaas, laakiin gacan ka wareegida hantidaas waxay taabo gal ku noqon kartaa oo keliya markay labo sano ka soo wareegato.

kh) Dhammaan xuquuqaha, ballanqaadyada, iyo deymaha kuwaas oo ka hor dhaqangalka xeerkan lagu lahaa hay'ad jirta, waxay noqon doonaan wax lagu leeyahay hay'addaas markuu dhaqangalo xeerkani.

d) Dhammaan tixraacyadda (references) hay'adaha ee lagu asaasay oo noqon kara heshiis walba ama aalad la xiriira hanti kasta, xuquuq, waajibaadyo, ama qaamaha kuwaas oo oo lagu wareejiyey farqada 2-aad xarfaha (j) iyo (x) oo jirey ka hor dhaqangalka xeerkan, waxaa loo arki doonaa, haddii uusan nuxurku wax kale tilmaamayn, waxaa loo fahmayaa si waafaqsan tixraacyadda hay'ad walba lagu asaasay iyadda la isticmaalay xeerkan.

r) Dhammaan ardayda hay'adaha tacliinta sare oo ku sii wata marag-aqooneed barnaamijyada digrii jaamacadda, dibolooma, shahaado ama cadayn (certificate) ka hor dhaqangalka xeerkan, wuxuu dhaqangalkiisa ka dib u oggolaanayaa inay sii wataan maadooyinkooda waxbarasho (courses), islamarkaasna lagu gudoon siin doono marag aqooneedyadooda kala duwan ee ay hay'adahaasu bixinayso.

## Qodobka 72-aad

## Afeef (Qodobo guud)

1. Dhammaan falalka (acts), jihaynta (directions), awaamiirta (orders), magacaabista (appointments), shuruudaha (requirements), awoodsiinta (authorizations) ama wax kale oo la bixiyey, la qaatay ama lagu qabtay sida dhammaan lacagaha, hantida (asssets), iyo lahaanshaha (properts) kale oo lagu helay xeerarkii la buriyey, waxay maadaama aysan la jaan-qaadi karin xeerkan loo aqoonsanayaa in lagu bixiyey, lagu qaatay, lagu sameeyey ama lagu yeeshay si waafaqsan xeerkan.
2. Dhammaan xeerarka iyo xeer-raacyadda lagu sameeyey si waafaqsan xeerarkii la buriyey, kuwaasoo shaqeynayey ka hor dhaqangalka xeerkan, way sii jiri doonaan haddii aysan ka hor imaanayn xeerkan, waxaana wax ka beddel loogu samayn karaa ama lagu burin karaa xeerar kale si waafaqsan xeerkan.
3. Dhammaan arrimaha anshaxa oo aan weli go'aan laga gaadhin waxaa lagu go'aaminayaa si waafaqsan xeerkan.
4. Dhammaan qawaaniinta ay soo saareen hay'adihii lagu asaasay si waafaqsan xeerarka la buriyey, kuwaasoo lagu shaqaynayey ka hor intuusan dhaqangal noqon xeerkan waxaa loo arki doonaa in lagu soo saaray si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 73-aad
## Dhaqangalka Xeerkan

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa Marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha DPL Saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**
**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**